

**Arjiyada waxaa la aqbalayaa  
sanadka oo dhan.**

Waraaqaha cadaynta dhalashada iyo dakhliga waxaa la xaqiijiyaa arji kasta.

Xaalado kale oo aad u qalmi karto.

Tilmaamaha dakhliga waxaa laga adeegsadaa bixinta tilmaamaha dakhliga federaalka ee ugu danbeeyay.

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan nagala soo Xidhiidh:

95 West 100 South Suite 200

Logan, Utah 84321

(435) 755-0081

Hablamos Español

[www.brheadstart.org](http://www.brheadstart.org)

## Howlgalkeena

Bear River Head Start waxaa ka go'an inay siiyaan fursado waxbarasho iyo korniin caruurta, qoysaska, shaqaalaha iyo bulshada taas oo ka qabsoomaysa deegaan dhaqaalayn iyo taageero. BRHS waxay taas ku suurto gelinaysaa sharaf, qadarin iyo daacadnimo.



Bear River Head Start

MA SAARO caruurta baska marka ay tagayaan ama ka imanayaan dugsiga

Ikhtiyaarada Gaadiidka Kale:

- Barnaamijka Ku Salaysan Guriga
- Waalidiinta Head Start waxay u sameyn karaan carruurtooda gaadhi wadaagis
- Gaadiidka dadwaynaha
- Baska degmo dugsiiyeedka meelaha qaar.



**Somali**

Bear River Head Start waxaa weeye barnaamij loogu talo geley dumarka uurka leh iyo caruurta 0-5 jirka ah, oo waxaa kamid ah dadka kuwa laxaadka la'.

Early Head Start  
Dugsiga Kahor

Adeegyada Guriga Ku Salaysan



### Early Head Start waxay u adeegtaa dumarka uurka leh iyo caruurta 0-3 sano jirka ah.

Barnaamijka Early Head Start Center-Based waxa uu siiyaa daryeel ilme oo nasasho leh oo tayo sare ah dumarka uurka leh iyo caruurta ilaa sadex sano jirka ah. Xaruntu waxay ku shaqaysaa saami ah afartii caruurba hal macalin ah. Macalin kasta waxaa uu maray tababar ka korniinka caruurnimada hore oo lagu bixiyo heerka u sareeya oo daryeel ah. Early Head Start waxaa diirada lagu saaraa korniinka ilmaha, waalidnimada/xidhiidhka, nafaqada, caafimaadka, iyo bixinta macluumaadka ku saabsan aqoonta, shaqada, iyo buuxinta yoolasha waxbarashada.

Qoysaska caruurta sabiga ah/socod baradka ah ee laxaadka la' ama dib u dhaca korniinka qaba ayaa hela adeeyada la isku duba riday ee Bixiyeaasha Qaybta C.



Early Head Start & Preschool Head Start, labada barnaamijba waxaa weeye kuwo Guriga Ku Salaysan oo lagu bixiyo degmooyinka soo socda: **Box Elder, Cache, Rich, Bear Lake, Caribou, Franklin, Oneida iyo South Bannock**

### Preschool Head Start waxa ay u shaqaysaa caruurta 3-5 sano jirka ah.

Ka Xarunta Ku Salaysan waxaa weeye khibrad fasal oo loogu talo geley 3 iyo 4 jari jiro caruurta ah (ilmuhu waa inuu noqdaa 3 sano jir Sebteember 1 deeda sanad dugsiyeedkan ama ugu yaraan 3 sano jir). Ilmo kasta si gaar ah shakhsi gaar ah ahaan ayaa loola dhaqmaa oo waxay u sahashaa korniinka iyo hormarka xadigiisa/keeda. Caruurta waxay ku kortaa, barataa, oo ku hormartaa deegaan xoojin leh oo ay joogaan shaqaale daryeel leh oo doonaya inay guul ka gaadhaan noloshu. Fasal kasta waxa ku jira 14-18 caruur ah (waxay ku xidhan tahay cabirka fasalka) oo waxaa jooga kaaliye macalin iyo macalin. Fasalada waxaa la qabtaa Isniin-Khamiis. Aroornimada, gelinka denbe, iyo maalin la balaadhiyay (6.5 saacadood) ikhtiyaar fasal ah oo ku xidhan aaga.

## Guriga Kusalaysan

Ikhtiyaarka barnaamijka guriga ku salaysan waxa uu ku salaysan yahay aragtida in waalidku yahay macalinka koowaad ee ugu muhiimsan ee caruurtooda. Waxbarashadu waxay marka kowaad ka dhacdaa guriga, deegaanka ugu dabiicisan. Waalidku markasta wax bay barayaan! Marka falsafadaa lagu xisaabtamo, qoysaska caruurtooda geliyay barnaamijka guriga ku salaysan waxay heli doonaan adeegyada Head Start oo noqon doonto qaab waalidka diirada lagu saarayo. Adeegyada caruurta waxay badanaa ka dhacaan guriga taas oo ah booqashooyin guriga ah oo todobaadle ah oo Macalinka Qoysku sameeyo. Waalidka iyo caruurta waxaa la siiyaa fursado ay kaga qaybqaadayaan hawlaha bulshada.

- Ikhtiyaarada waxbarashada Xarunta Waxbarashada Dugsiga Kahor, Xarunta Early Head Start Center ama Guriga Ku Salaysan
- Taageerada Hooyada Uurka Leh
- Qorshayaasha waxbarashada shakhsi ahaaneed
- U ololeeyaha qoyska ee taageera baahiyaha qoyska.
- Baadhitaanka hormarka
- Baadhitaanka maqalka iyo araga
- Cuntada nafaqada leh
- Taageerada caafimaadka maskaxda

### Ikhtiyaarada Xarunta Ku Salaysan ee Early Head Start:

- ◆ Logan (South Center)  
670 West 400 South  
Logan, Utah 84321
- ◆ Logan (North Center)  
1300 North 200 East, Ste. 102  
Logan, Utah 84321

EHS Saacadaha I-J 8:00 subaxnimo—2:00 duhurnimo

### Ikhtiyaarada Xarunta Ku Salaysan ee Head Start Dugsiga Kahor:

Logan, Brigham, Hyde Park, Hyrum, Malad, Richmond, Smithfield, Tremonton, Preston, Paris

